



ismaamulka san diego

# BMP-yadaada Dhismaha

T U S M A D A X O G T A

Mashruucyada hormarinta ayaa ku badala dhulka taagaga dabiiciga ah qaab dhismeedyo dadku sameeyo sida meelaha la maro, aagaga baakinka, iyo dhismeyaasha. Si kaduwan dagaandegyada dabiiciga ah oo awooda inay dhuuqaan biyaha roobka, noocyada cusub ee dagaandegyada adag ee la xariira dhismaha ayaa abuura cadad dheeri ah oo biyaha daadka roobka ah.



**Daadkaan ayaa sidi kara waxyaabo sun ah sida qashinka, daawada beeraha, sunta cayayaanka, iyo qaruurax galaaya balida, wabiyada, iyo badaha deegaanka. Si loo yareeyo saamaynta xun ee biyaha daadku ku reebi karaan marinadeena biyaha ee maxaliga ah, dhismayaasha qaar ee la abuuray ayaa laga doonayaa inay lahaadaan farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka dhismaha, ama "BMP-yada Dhismaha".**

Si ay gacan uga gaystaan in mulkiileyaashu si sax ah u fahmaan waajibaadka saaran ee la xariira BMP-yada dhismaha, **Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego** ayaa abuuray tasmadaan xogta si looga jawaabo su'aalaha aad qabi karto.



Marinka Daadka ee BMP



BMP-yada Geedaha lagu beeray



BMP-yada Geedaha lagu beeray

## Waa maxay BMP-ga dhismaha?

BMP-yada Dhismaha waa xarumo gacan ka gaysanaaya kahortaga in wasaqda ku jirta biyaha daadka ay ka baxdo aaga dhismaha laga dhisay, ayna gasho marinadeena biyaha, kadibna saamaynta ku yeelato kanaalada biyaha. Dhammaan noocyada BMP-yada dhismaha ayaa u baahan kormeer joogto ah iyo dayactir si loo xaqiijiyo inay si sax ah u shaqaynayaan.

Mulkiileyaasha dhismaha ayaa masuul ka ah soo gudbinta cadaymaha natiijooyinka kormeerkooda iyo shaqooyinka dayactirka kahor xili roobaadka (Oktoobar 1 deeda). **Waa tan sababta Ismaamulka San Diego uu u codsanaayo xog ku saabsan BMP yada dhismahaaga.** Fadlan ogoow in haddii aadan raacin shuruudahaan ay keenayso baaritaanka booliiska ama kormeer dawaladu samaynayo.





BMP-ga Biyo Miirista

TALAABADA

1

## Maxaan U baahanahay Inaan sameeyo?

### Goob u samee dhammaan BMP-yadaada

BMP-gaaga waxaa lagu qori doonaa Foomamka Xaqiijinta Shaqada iyo Dayactirka oo ay kuusoo dirayso Ismaamulku sanad kasta. Goobahooda gaarka ah ayaa ku qoran qorshahaaga naqshada dhismaha.

TALAABADA

2

### Kormeer oo ilaali BMP-yadaada

Foomamkaaga Xaqiijinta Shaqada iyo Dayactirka waxaa ku jiri doona tilmaamo ku aadan sida aad u kormeerayso una ilaalinayso BMP-gaaga. Dayactirka caadiga ah waxaa ku jira ka saarida qashinka iyo qaruuraxa aruuray, jarista geedaha aadka ugu baxay, ciid celinta meelaha ciid xaarku ku dhacay, iyo inaad badesho qaybaha halaabay ee BMP-yada. Xaqiiji inaad qorto natiijooyinka kormeerkaaga iyo shaqooyinka dayactirka oo aad ku haynayso Foomamka Xaqiijinta Shaqada iyo Dayactirka.

TALAABADA

3

### Sawir ka qaad BMP-gaaga

Kadib marka aad kormeer iyo/ama dayactir ku samayso BMP-gaaga, sawir ka qaad BMP ga. Sawirku waa inuu muujiyaa in BMP-gu xaalad fiican ku jiro uuna diyaar u yahay xili roobaadka soo socda. Xaqiiji inaad ka qaado ugu yarana hal sawir BMP-kasta.

TALAABADA

4

### U dir Dukumiintigaaga Ismaamulka

U dir Foomamkaaga Xaqiijinta Shaqada iyo Dayactirka, sawirada BMP-ga, iyo dukumiintiyada kale (qaansheegyada adeegga, risiidyada, iwm.) Ismaamulka.

## Ku dir oonlaynka:

- Booqo webseedkeena oo ah [www.sandiegocounty.gov/stormwater](http://www.sandiegocounty.gov/stormwater) kadibna guji "Maintaining my Structural BMP (Dayactirka BMP-ga Dhismahayga)" si aad u hesho xog adoo adeegsanaaya barta oonleena ah.

## Kudir iimeelka:

**BMP.Program@sdcounty.ca.gov**

- Kudar ciwaankaaga dhismahaaga iyo erayada "Self-Verification (Xaqiijinta Iskaa ah)" ciwaanka fariinta.
- Iimeellada loo diro ciwaankaan waa inay ka yar yihiin 10MB. Iimeellada waawayn lama heli karo.



Haynta BMP ga

waad ku mahadsan  
tahay samaynta  
qaybtaada si

loo ilaaliyo  
marinadeena biyaha

## Haddii aad qabto su'aalo, Nagalaso Xariir:

**Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha**

1-858-495-5323

[BMP.Program@sdcounty.ca.gov](mailto:BMP.Program@sdcounty.ca.gov)

[www.sandiegocounty.gov/stormwater](http://www.sandiegocounty.gov/stormwater)